



Wakiil Ka Noqosho Si Sharci Ah

Powers of Attorney

Muxuu yahay Wakiil ka noqosho sharci ah?

Wakiil ka noqosho sharci waa ogolaansho qoraal ah oo qof loo siiyay in uu mas'uul ka noqdo hantidaada ama lacagtaada, sidii aad adigu u dooneyso. Dukumeentiga wakiil ka noqoshada sharciga ah, qofka awooda wakiilnimada bixinaya waxaa loo yaqaan "Wakiishe (*waa qofka awooda bixiyay*). Qofka qaadaya mas'uuliyadda waxaa loo yaqaan "Wakiil." Qofkaasi ma aha in uu yahay garyaqaan.

Awood intee le'eg ayuu haystaa wakiilka gaarka ah?

Haddii wakiilka gaarka ah uu magacaaga ku sameeyo talaabo sharci ah, waxay ka dhigan tahay in aad adgu samaysay oo kale. Wakiil ka noqoshada sharciga ah ma diidayso in weli adiga laftaadu aad is matasho, laakiin wakiilka gaarka ahi waa ku **matali karaa adiga**. Ma aha inay kuu sheegaan ka hor inta aysan sameyn.

Wakiilka gaarka ahi ma aha qofka mas'uul kaa ah. Inta aad ismeel marin karto, laguguma khasbi karo inaad guurto. Ma aad waayeysid xaqqa aad ku maamuli karto hantidda iyo lacagta. Ma aad waayeysid xaqqa aad ku gaari kartid go'aano ku saabsan noloshaadda sidda meesha aad ku noolaanayso iyo sidda aad u isticmaalayso waqtigaaga. Waad la noqon kartaa markaad doonto awoodda wakiil ka noqoshada sharciga ah.



Inta badan waxaad siisaa awoodda wakiil ka noqoshada sharciga ah in qof kale uu kuu saxiixo waraaqaha la xiriira guriga iyo arrimaha lacagta. Awoodda waxaa lagu koobi karaa wax yaabo gaar ah, sida gaddida hantida ma guurtada ah, ama waa la balaarin karaa, sida hantida maguurtada ah oo dhan, iyo arrimaha lacagta. Waxay ku xirran tahay waxa aad ku qorto foomka wakiil ka noqoshada sharciga ah.

Yaan ka dhigtaa qof ii noqda wakiilka sharciga ah?

Qof kasta oo leh karti iyo awood, mas'uuliyad qaadi kara oo ka weyn 18 sanno waad wakiilkan kartaa. Waxaa ka mid noqon kara xubnaha qoyska. Dada badan waxay doortaan qofka u dhaxa, ama ubadkooda. Waxaa muhiim ah in aad doorato qof aad

aamini karto. Xusuusnow waxa ay gacanta ku hayn doonaan waxyaabaha sidda xisaabtaada bangiga ama hantidaada.

Waxaad qabsan kartaa wax ka badan hal qof oo wakiil gaar ah kuu noqda. **Laakiin Xasuusnow**, qof kasta magacaaga ayuu wax ku samayn karaa asagoo aan qofka kale wax ogolaansho ah weydiisanayn, haddii aadan adigu u qorin in mas'uuliyadiisu ay ka duwan tahay kuwa kale.

Waxaad kaloo magacaabi kartaa “xil la wareege gaar ah.” Kani waa qof qaadaya mas'uuliyadda haddii wakiilku uu maqan yahay ama mar dambe uusan mas'uuliyad qabaneyn.



Maxay kaloo tahay in uu sameeyo wakiilka gaarka ah?

Wakiilka gaarka ah wuxuu mas'uul ka yahay in uu hayo diiwaan gelinta wax isweydaarsiga uu adiga kuu samaynayo. Tan waxaa loo yaqaan “ xisaabin”. Waydii in aad aragto diiwaankaas si joogta ah. Xitaa haddii aad aaminsantahay qofka, in aad hesho xisaabaadka si joogta ah bishiiba ama 3dii biloodba hal mar waa ra'yi wanaagsan. Waxaa kaloo ra'yi wanaagsan ah in adiga iyo qof kale ee qoyska ka mid ah in loo soo diro xisaabaadka si ay u caawimaan ul ana socdaan waxa jira.

Sharci ahaan, wakiilka gaarka ahi waa in uu wax kasta u sameeyaa sida ugu wanaagsan ee ay adiga dantaadu ku jirto.

Sidee u sameeyaa wakiil ka noqosho sharci ah?

Wakiil ka noqoshada sharciga ahi waa in ay tahay qoraal, leedahay taariikh, adigu aad ku hor saxiixday nootaayo dadweyne. Haddii aad rabtid awood siintaasi in ay ku dhamaato waqti go'an, ku qor tariikhda, maalinta iyo bisha ay ku dhamaanayso.




Muhiim: foomka wakiilka ka noqoshada sharciga ah waxa uu taabo gali markiiba kolka la saxiixo. Waxay awood siinaysaa wakiilka gaarka ah isla markiiba – ma aha oo keliya in aad xanuunsatay ama aadan go'aan isu gaari karin.

Foomka wakiil ka noqoshada waxaa wax laga bedelay Janaayo 2014. Foomka hadda jira wuxuu leeyahay tilmaan bixin badan iyo digniino ku saabsan kaalinta iyo mas'uuliyadda wakiilka gaarka ah.

Haddii aad horey u samaysay wakiil ka noosho sharci ah weli waa wanaagsanyahay. Uma baahnid in aad mid kale samaysid. Haddii aad **hadda** samaynaysid foomka wakiil

ka noqosho sharci ah, isticmaal foomka halkaan ku lifaaqan. Hubi in aad akhriday “Ogaysiin Muhiim ah ee qofka asliga ah” oo ku qoran bogga ka dambeeya foomka. Waa in aad saxiixdaa si aad u muujiso in aad akhriday waana in aad u haysaa sidii qayb ka mid ah foomka.

Aman O, [Ka Diyaarso wakiil ka noqoshada sharciga ah barta internetka](http://www.lawhelpmn.org/forms) halka www.lawhelpmn.org/forms. (ingiriisi kaliya)



- Ka fiiri hoos “Health Care and Power of Attorney” (*Daryeelka Caafimaadka iyo Wakiil ka noqoshada Sharciga ah*)
- Guji halka “Power of Attorney” (*Wakiil ka Noqoshada Sharciga ah*)

Tani waa su’aalo talaaba talaabo ah oo ku gaarsiinaya in aad daabacatid foomkii oo dhamaystiran marka aad ka wada jawaabtid su’aalaha.

Qok kasta ma samayn karaa wakiil ka noqosho sharci?

Waa in maskaxdaadu leedahay karti iyo awood, oo aad go’aamada keligaa qaadan kartid. Maskax leh karti iyo awood waxay la micne tahay “ maskax fiyoow”. Dadka qaba cudurka ilowshaha ama curyaanimo kale waa laga yaabaa in ay maskax ahaan fiyow yihiin xitaa iyaga oo qaba cudurkaas. Haddii ay su’aal ka jirto fiyoobaanta maskaxda, waxaad la hadli kartaa dakhtarkaaga ama bixiye daryeel caafimaad ka hor inta aadan saxiixin foomka wakiil ka noqoshada sharciga ah.



Haddii qofka uusan maskax ahaan fiyoobayn, ama uu maskax ahaan dhimanyahay, ma samayn karo wax ah wakiil ka noqosho sharci ah. Marka xaaladaani jirto, waxaa loo baahanyahay in la sameeyo mas’uul ka noqosho ama qof sharci ahaan loo siiyay in uu maamulo hantida.

Wixii maclummad dheeraad ah ka fiiri xogta urursan, [Mas’uul Ka Noqoshada Iyo U Maamulidda Dhagaalaha](#).

Muxuu yahay wakiil ka noqosho mudada ku xiran?

“Mudada ku xiran” micneheedu waa mid dhamaanaya. Inta badan, haddii aad noqoto aan miyirkuusu fayoobeyn, wakiil ka noqosho sharciha ah ma aha dhaqangal. Laakiin waad qori kartaa haddii aad rabto in awoodaas ay sii socoto haddii aad noqoto qof maskaxda aan ka fiyoobayn. Markaas waxaa la oran kara waa wakiil ka noqosho sharci oo waaraysa. Haddii aad ku sheegtay wakiilashadda “in awooda

wakiil ka noqoshada sharci waxba uma dhimayso awoodda qof wakiilka ah haddii aanan go'aan isu gaari karin" markaas waxay noqonaysaa wakiil ka noqosho joogta ah.

Foomka halkaan ku xirran, marka aad calaamadiso " Waakiil ka noqoshada sharciga ahi waxay jiraysaa xitaa haddii aan anigu noqdo qof go'aan isu gaari karin oo aan lahayn karti iyo awood" waxay ka dhigaysaa wakiil ka noqoshada mid rasmi ah.

Haddii aad noqoto qof maskaxda ka jiran, wakiil ka noqoshada sharciga ah waxaa joojin oo kaliya wakiil ay maxkamaddu u magacowday oo sharci ahaan awood loo siiyey maamulka hantida.

Ma u baahanahay garyaqaan iga caawima in aan sameeyo wakiil ka noqosho sharci ah?

Maya. Laakiin waa wax wanaagsan in aad isticmaasho garyaqaan. Maxkamadu waxay fiirinaysaa waxa ay sameeyaan wakiilada cidda maxkamadu u magacowday in ay mas'uul ka noqdaan oo maamulaan hantida qofka, laakiin ma fiiriyaan waxa uu sameeynayo wakiilka gaarka ah. **Wakiilka gaarka ah wuu kaa faa'idaysan karaa.** Garyaqaanku wuxuu kaa caawimi karaa in lagu qoro waxyaabaha aad rabto warqadaha wakiil ka noqoshada sharciga ah oo xadidaya waxa uu samayn karo wakiilka gaarka ah ama ka dhigaysa in uu kula wadaago waxa uu ku samaynayo guriga/hantida ma guurtada ah iyo lacagta.



Sidee u shaqeeyaa wakiilka sharciga ah yaana la siinayaa koobiyada?

Labadaba, wakiilkaaga gaarka iyo qofka la wadaaga wakiilashada waa in ay haystaan koobi ka mid ah wakiilashada. Haddii aad awood u siinayso ah in uu iibiyo dhul, waa in aad nuqulka asliga ah oo saxiixan siisaa xafiiska diiwaangelinta degmada. Haddii awoodu ay la xiriirto lacag, ka xaree nuqul bangigaaga haddii aad rabo in wakiilkaaga-idmani uu awoodo inuu adiga ku matalo.

Marka wakiilka gaarka ah uu adiga ku matalayo, waxay wax ku saxiixaan magacooda, markaas ka dib waxay qoraan:

(Saxiixooda) **La wadaagga wakiilka ee** (Magacaaga).

Ma joojin karaa wakiil ka noqoshada sharciga?

Haa. Qof leh karti iyo awood waa baabi'in karaa wakiil ka noqoshada sharciga ah waqti kasta. Waa in aad qoraal ku sheegtaa in aad baabi'isay wakiil ka noqoshada sharciga ah, aad saxiixdaa, ku qortaa taariikhdataariikh nootaayada horteeda. Waa in aad koobi u dirtaa wakiilka, qof kasta, xafiis kasta iyo bangiga wakiilkaaga arrimahaaga kala xiriiray. Haddii aadan dirin koobiyada baabi'inta, shirkaduhu ma ogaanayaan, wakiilka gaarka ahna sidiisii ayuu howsha u wadanayaa.



Waa in aad adigu soo ceshataa wakiil ka noqoshada sharciga ah nuqulkii asliga ahaa.

Halkaan waxaa ku lifaaqan foomka baabi'inta wakiil ka noqoshada sharciga ah.

Ama waxaad kartaa [Si xiriisan u samay Baabi'inta Wakiil ka Noqoshada Sharciga ah](http://www.lawhelpmn.org/forms) halkan www.lawhelpmn.org/forms. (ingiriisi kaliya)



- Ka fiiri hoos “Health Care and Power of Attorney” (*Daryeelka Caafimaadka iyo Wakiil ka noqoshada Sharciga ah*)
- Guji halka “Revocation of a Power of Attorney” (*Baabi'inta Wakiil ka Noqoshada Sharciga ah*)

Tani waa su'aalo talaaba talaabo ah oo ku gaarsiinaya in aad daabacato foomkii oo dhamaystiran marka aad ka wada jawaabtid su'aalaha.

Fiiro gaar ah: Wakiil ka Noqoshada Sharciga ah waxay dhamaataa marka uu geeriyoodo wakiilkaaga. Haddii aad siiso wakiil ka noqoshada sharciga ah qofka aad isu dhaxdaan, waxay dhamaataa marka qofkii uu bilaabo is furitaanka, kala noolaanshaha, ama dacwad baabi'inta isu dhixidda.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

STATUTORY SHORT FORM POWER OF ATTORNEY

MINNESOTA STATUTES, SECTION 523.23

*(FOOM GAABAN OO U QORAN SIDA SHARCIGU DHIGAYO EE WAKIIL KA NOQOSHADA SHARCIGA AH
SHARCIYADA MINNESOTA, QEYBTA 523.23)*

Before completing and signing this form, the principal must read and initial the IMPORTANT NOTICE TO THE PRINCIPAL that appears after the signature lines in this form. Before acting on behalf of the principal, the attorney(s)-in-fact must sign this form acknowledging having read and understood the IMPORTANT NOTICE TO THE ATTORNEY(S)-IN-FACT that appears after the notice to the principal

(Ka hor inta aadan dhamaystirin oo aadan saxiixin foomka, qofka asliga ahi waa in uu akhriyaa oo uu ku qoraa xarafka hore ee magaciisa qoraalka ah OGAYSIINTA UGU MUHIIMSAN EE QOFKA WAKIILKA ee ka muuqata EEA hoose ee saxiixa foomkaan. Ka hor inta uusan matalin qofka asliga ah, wakiilka gaarka ah waa in uu saxiixaa fooma isagoo qiranaya in uu akhriyay oo fahmay OGAYSIINTA UGU MUHIIMSAN EE WAKIILKA GAARKA AH oo ka muuqata Meesha ka hoosaysa ogaysiinta qofka asliga ah)

PRINCIPAL (Name and address of person granting the power)

(WAKIISHE (Magaca iyo Cinwaanka qofka awoodda bixinaya))

ATTORNEY(S)-IN-FACT

(Wakiilka gaarka ah)

(Names and Addresses)

(Magaca iyo Cinwaanka)

SUCCESSOR ATTORNEY(S)-IN-FACT

(Qofka Xilka kala wareegaha Wakiilka gaarka ah)

(Optional) To act if any named attorney-in-fact dies, resigns or is otherwise unable to serve.

((IKhasab ma aha) in uu la wareego haddii uu wakiilka gaarka ah geeriyood, iscasilo, ama uusan shaqada qaban karin)

(Name and Address) *(Magaca iyo Cinwaanka)*

(Qofka Xilka kala Wareegaya ee koowaad)

First Successor

(Qofka Xilka kala Wareegaya ee labaad)

Second Successor

NOTICE: If more than one attorney-in-fact is designated to act at the same time, make a check or "x" on the line in front of one of the following

statements:

(OGAYSIS: Haddii wax ka badan hal wakiil gaar ah loo xil saaray in ay ku matalaan isku mar, ku qo' calaamadda sax ama "x" sadarka ka horeysa weedha soo socota)

____ Each attorney-in-fact may independently exercise the powers granted.

(Mid kasta oo ah Wakiil ka noqosho sharci wuxuu six ama ah u samayn karaa awooda la siiyayay)

EXPIRATION DATE (Optional)

(Taariikhda ay ku egtahay (Khiyaaraka))

____ Use specific month, day and year only

(Isticmaal bisha ay tahay, maalinta iyo sannadka)

____ All attorneys-in-fact must jointly exercise the powers granted.

(Wakiilada gaarka ah oo dhan si wada jir ah way u isticmaali karaan awoodooda)

I (the above named Principal), appoint the above named Attorney(s)-in-fact to act as my attorney(s) in fact:

(Aniga oo ah (magaca qofka asliga ah ee kor ku xusan), waxaan u xilsaaray wakiilka gaarka ah ee kor ku xusan in uu yahay wakiilkayga gaarka ah ee i matala)

FIRST: To act for me in any way I could act with respect to the following matters, as each of them is defined in Minnesota Statutes, section 523.24:

(Kowaad: In ay I matalaan si kasta oo aan anigu isu matali karay arrimaha soo socda, oo mid kasta lagu qeexay qodob sharci ah ee Minnesota, qaybta 532.24)

(To grant the attorney-in fact any of the following powers, make a check or "x" on the line in front of each power being granted. You may, but need not, cross out each power not granted. Failure to make a check or "x" on the line in front of the power will have the effect of deleting the power unless the line in front of the power (N) is checked or x-ed.)

(Si aad u siiso wakiilka gaarka ah mid walba oo ka mid ah awoodaha soo socda, ku calaamadi sax ama "x" sadarka hortiisa ay ku qoran tahay awoodda la siiyay mid kasta. Waa laga yaabaa, laakiin uma baahnid, in aad xariiq dheer oo gees ka gees ah mariso awoodaha aadan siinayan wakiilka. Haddii aad ku qori waydid calaamadda sax ama "x" sadarka hortiisa ay ku qorantahay awooda, waxay ka dhigantahay in awoodaas laga tirtiray meesha, haddii aan sadarka awooda aan hortiisa lagu calaamadin (N) ama X)

Check or "x" (Sax ama "x")

____ (A) Real property transactions" (Wax is weydaarsiga hantida dhabta ah ee ma guurtada ah;

I choose to limit this power to real property in _____ County, MN described as follows: (use legal description. Do not use address.)

(Waxaan doortay in aan ku awooda xadido hantida ma guurtda ah ee dhabta ah _____ Degmada, MN lagu xusay sida soo socota: (Isticmaal sifayn sharci ah. Ha isticmaalin cinwaanka)

(If more space is needed, continue on the back or on an attachment.)

((Haddii meel banana oo intaad ka badan loo baahanyahay, istimall xagga dambe ama warqad kale ku xir foomkaan))

- _____ (B) Tangible personal property transactions *(Wax is weydaarsiga hantida maguurtada ah ee la taaban karo);*
Bond, share, and commodity transactions *(wax is weydaarsiga saami dowlad qortay, saami shirkad, ama*
_____ (C) *alaab (badeeco ah));*
- _____ (D) Banking transactions *(Wax is waydaarsi Bangi);*
- _____ (E) Business operating transactions *(Wax is waydaarsi ganacsi shaqeeya);*
- _____ (F) Insurance transactions *(wax is weydaarsi caymis) ;*
- _____ (G) Beneficiary transactions *(wax is weydaarsi ka dhaxal suge);*
- _____ (H) Gift transactions *(Wax is weydaarsi hadiyad);*
- _____ (I) Fiduciary transactions *(wax is weydaarsiga amaanada);*
- _____ (J) Claims and litigations *(wax is weydaarsiga Sheegasho iyo Dacwad);*
- _____ (K) Family maintenance *(Wax is weydaarsiga isku haynta qoyska);*
- _____ (L) Benefits from military service *(wax is weydaarsiga gargarka adeegga ciidmamada);*
- _____ (M) Records, reports, and statements *(wax is weydaarsiga diiwaanka, war bixinta, iyo warbixinada);*
- _____ (N) All of the powers listed in (A) through (M) above and all other matters other than health care decisions under a health care directive that complies with Minnesota Statutes, chapter 145C.
(dhamaan awoodaha ku qoran liistada kore ee (A) illaa (M), iyo wax yaabaha kale oo dhan oo aan ka ahayn go'aamada daryeelka caafimaadka oo xoos taga awaamirta daryeelka caafimaada ee waafaqsan qodobada sharciga ah Minnesota, cutubka 145C)

SECOND: (you must indicate below whether or not this power of attorney will be effective if you become incapacitated or incompetent. Make a check or "x" on the line in front of the statement that expresses **your** intent.)

(LABAAD: (waa in aad hoos ku sheegtaa in wakiil ka noqoshada sharciga ah in ay jirayso haddii aad noqoto qof aan sharci ahaan go'aan gaari karin oo aan noloshiisa maarayn Karin ama karti iyo awood beelay. Ku qor claamadda sax ama (x) sadarka hortiisa ay ku qorantahay warbixinta iyo sida aad ula jeedo)

_____ This power of attorney shall continue to be effective if I become incapacitated or incompetent.
(Wakiil ka noqoshadu way soconaysaa haddii aan noqdo qof aan sharci ahaan go'aan gaari karin oo aan noloshiisa maarayn karin, ama aadan go'aan isu gaari karin)

_____ This power of attorney **shall not** be effective if I become incapacitated or incompetent.
*(Wakiil ka noqoshadu **ma ah** wax sii soconaya/jirayso haddii aan noqdo qof aan sharci ahaan go'aan gaari karin oo aan noloshiisa maarayn karin, ama karti iyo awwod belay)*

THIRD: My attorney(s)-in-fact MAY NOT make gifts to the attorney(s)-in-fact, or anyone the attorney-in-fact is legally obligated to support, UNLESS I have made a check or an "x" on the line in front of the second statement below and I have written in the name(s) of the attorney(s)-in-fact. The second option allows you to limit the gifting power to only the attorney(s)-in-fact you name in the statement. Minnesota Statutes, section 523.24, subdivision 8, clause (2), limits the annual gift(s) made to my attorney(s)-in-fact, or to anyone the attorney(s)-in-fact are legally obligated to support, to an amount, in the aggregate, that does not exceed the federal annual gift tax exclusion amount in the year of the gift.

(SADDEX: wakiilka gaarka ah ma siin karo wax hadiyad ah wakiil gaar ah oo kale, ama wakiil gaar ah oo kasta ma siin karo cid uu sharci ahaan asagu ku khasbanaa in uu caawimo, HADDII aanan anigu ku calaamadin sax ama "x" sadarka hortiis ay ku qorantahay weedha labaad ee xagga hoose ku taal oo aan saxiixay kuna qoray magaca wakiilka gaarka ah. Doorashada labaad wuxuu kuu ogolaanayaa in aad xaddido awooda bixinta hadiyadda oo aad ku ku koobto wakiilka gaarka ah oo keliya oo aad magaciisa ku sheegtay warbixinta. Qodob sharciiyeedka Minnesota, waaxda 523.24, qayb hoosaadka 8, qodobka (2), wuxuu xadidayaa hadiyadaha sannadkiiba la siin karo wakiilka gaarka ah, ama wakiil gaar ah

oo kasta siin karo cid uu asagu sharci ahaan ay Khasab ku ahayd in uu caawimo, tirada iyo isku darka oo aan ka badnayn tirsiga hadiyadaha sannadkii cashuurta dawlada dhexe ay ogoshahay in looga saaro haddiyad ahaan sanandkiiba)

I **do not** authorize any of my attorney(s)-in-fact to make gifts to themselves or to anyone the attorney(s) in fact have a legal obligation to support.

(U ma ogolaan wakiilka gaarka ah in asagu isa siiyo wax hadiyad ah ama wakiilka gaarka ahi uu siiyo hadiyad qof kale oo asagu sharci ahaan ku khasbanaa in uu caawiyo)

I authorize _____ (write in names), as my attorney(s)-in-fact, to make gifts to themselves or to anyone the attorney(s)-in-fact have a legal obligation to support.

(Aniga Waxaan u ogolaaday _____ (qor magaca) wakiilka gaarka ah in asagu isa siiyo waxii hadiyad ah ama wakiilka gaarka ahi uu siiyo hadiyad qof kale oo sharci ahaan asagu ku khasbanaa in uu caawimo)

FOURTH: (you may indicate below whether or not the attorney-in-fact is required to make an accounting. Make a check or "x" on the line in front of the statement that expresses your intent.)

(AFARAAD (Waxaad hoos ku muujin kartaa in wakiilka gaarka ah uu samany karo xisaabaadka. Ku qor calaamadda sax ama "x" sadarka ka horeeya weedha qeexaysa u jeedadaada)

My attorney-in-fact need not render an accounting unless I request it or the accounting is otherwise required by Minnesota Statutes, section 523.21.

(Wakiilka gaarka ah ma qaban karo wax xisaabaad ah, haddii aanan anigu weydiisan ama ay xisaabaadka u baahantahay qodob sharciyeedka Minnesota, waaxda 523.21)

My attorney-in-fact must

render _____ (Monthly, Quarterly, Annual) accountings to me, or _____

(Name and Address)

during my lifetime, and a final accounting to the personal representative of my estate, if any is appointed, after my death.

(Wakiilka gaarka ah waa ii samayn karaa xisaabaadka ama _____ Bisha , 3da Billod, Sannadka ama _____

(Magaca iyo Cimwaanka)

Inta aan noolahay, iyo xisaabaadka ugu dambeeya oo loo dhiibo qofka igu matal dhaxalka, haddii qof loo xil saaro, marka aan dhinto ka dib)

IN WITNESS WHEREOF, I have hereunto signed my name _____ day of _____ 20 _____

(Waxaan markhati ka ahay, Anniga oo hoos magacaygu ku saxiixan yahay _____ Maanta oo taariikhdu tahay _____ 20__)

(Signature of Principal)
(Saxiixa qofka asliga ah)

(Acknowledgment of Principal) Qiraalka wakiishaha

STATE OF MINNESOTA) *Gobolka Minnesota*

) ss.

COUNTY OF _____) *Degmada*

The foregoing instrument was acknowledged before
me this _____ day of _____

20 _____, by _____

(Insert name of principal)

(Caddaynta kor ku qoran waxaa hortayda ku qirtay _____ Maant oo ay taariikhdu tahay _____ 20____,

_____ (Ku qor magac wakiilka)

Signature of Notary Public or other official

(Saxiixa nootaayad ama sarkaalka)

Acknowledgment of notice to attorney(s)-in-fact and specimen signature of attorney(s)-in-fact.

(Qirashada ogaysiinta wakiilka gaarka ah iyo saxiixa wakiilka gaarka ah))

By signing below, I acknowledge that I have read and understand the IMPORTANT NOTICE TO ATTORNEY(S)-IN-FACT required by Minnesota Statutes, section 523.23, and understand and accept the scope of any limitations to the powers and duties delegated to me by this instrument.

(Marka aan hoos saxiixo, waxaan qirayaa in aan akhriyay oo fahmay OGAYSIINTA MUHIINKA AH EE WAKIILKA GAARKA AH sida looga baahanayaa qodobka sharciga ah ee Minnesota 523.23, aan fahmay oo aan ogolaaday xadka iyo xuduudda awoodayda iyo hawsha la ii xilsaaray sida ku qoran caddayntaan)

(Notarization not required)

(Nootaayo looma baahna)

Specimen signature(s) of Attorney(s)-in-Fact:

(Notarization not required)

(Saxiixa wakiilka gaarka ah:

Nootaayo looma baahna)

Specimen signature(s) of Attorney(s)-in-Fact:

(Saxiixa wakiilka gaarka ah)

(Notarization not required)

(Nootaayo looma baahna)

This instrument was drafted by:

(Caddayntaan waxaa diyaariyay)

IMPORTANT NOTICE TO THE PRINCIPAL

(Ogaysiinta Muhiimka ah ee qofka Asliga ah)

READ THIS NOTICE CAREFULLY. The power of attorney form that you will be signing is a legal document. It is governed by Minnesota Statutes, chapter 523. If there is anything about this form that you do not understand, you should seek legal advice.

(SI TAXADAR LEH U AKHRI OGAYSIINTAAN. Foomk wakiil ka noqoshada sharciga ah ee aad saxiixi doonto waa dukumenti sharci ah. Waxaa xukuma qodobka Sharciga ah ee Minnesota, Cutubka 523. Haddii ay jiraan wax aadan fahmin ee foomkaan ku qoran, raadso la talin sharci ah)

PURPOSE: The purpose of the power of attorney is for you, the principal, to give broad and sweeping powers to your attorney(s)-in-fact, who is the person you designate to handle your affairs. Any action taken by your attorney(s)-in-fact pursuant to the powers you designate in this power of attorney form binds you, your heirs and assigns, and the representative of your estate in the same manner as though you took the action yourself.

(UJEEDO: Ujeedka wakiil ka noqoshada sharciga ah waa adiga, oo ah qofka asliga ah, oo siinaya awood buuxda oo balaaran wakiilka gaarka ah, kaas oo ah qofka loo xilsaaray in uu maamulo arrimahaaga. Fal kasta oo uu sameeyo wakiilka gaarka ah oo la xiriirta awoodda aad siisay in uu kuu noqdo wakiil ka gaarka ah, sharci ahaan waa ku qanbanaysaa adiga, dadka dhaxalkaaga leh iyo dadka ay wakiishaan, iyo wakiilada dardaarankaaga si la mid ah sidii adiga oo falkaas sameeyay)

POWERS GIVEN: You will be granting the attorney(s)-in-fact power to enter into transactions relating to any of your real or personal property, even without your consent or any advance notice to you. The powers granted to the attorney(s)-in-fact are broad and not supervised. THIS POWER OF ATTORNEY DOES NOT GRANT ANY POWERS TO MAKE HEALTH CARE DECISIONS FOR YOU. TO GIVE SOMEONE THOSE POWERS, YOU MUST USE A HEALTH CARE DIRECTIVE THAT COMPLIES WITH MINNESOTA STATUTES, CHAPTER 145(C).

(AWOODDA LA SIYAY waxaad siinaysaa wakiilka gaarka ah in uu galo wax is weydaarsi la xirrira wax kasta oo hantidaada gaarka ah ka mid ah xitaa adoo aan wax ogolaansho ah ama la socodsiin ah hore lagu siin. Awoodaha la siiyay wakiilka gaarka ah waa ballaaran yihiin lamana kor meero waxa ay qabanayaan. WAKIILKA GAARKA AH MA LAHA AWOOD UU GO'AAN UGA GAARO DARYEELKA CAAFIMAADKAAAGA. SI AAD AWOODAAS QOF U SIISO, WAA IN AAD ISTICMAASHAA AMARKA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE WAAFAQSAN QODOBKA SHARCIGA AH EE MINNESOTA, CUTUBKA 145 (C))

DUTIES OF YOUR ATTORNEY(S)-IN-FACT: Your attorney(s)-in-fact must keep complete records of all transactions entered into on your behalf. You may request that your attorney(s)-in-fact provide you or someone else that you designate a periodic accounting, which is a written statement that gives reasonable notice of all transactions entered into on your behalf. Your attorney(s)-in-fact must also render an accounting if the attorney-in-fact reimburses himself or herself for any expenditure they made on behalf of you.

(MAS'UULIYADDA WAKIILKA GAARKA AH: Wakiilka gaarka ah waa in uu hayaa diiwaan dhamaystiran wax is weydaarsiga uu galay asga oo adiga ku matalaya. Waxaad weydiisan kartaa wakiilka gaarka ah in uu ku siiyo adiga ama qof kale oo aad u xilsaartay, xisaabaadkii xiliyada sannadka oo qoraal ah, oo ku siinaysa faahfaahin macquul ah wax is waydaarsiga lagu sameeyay matalaadaada. Wakiilka gaarka ah waa in uu ku siiyaa xisaabaadka haddii isagu labaxay kharajka uu u galay matalaadaada.)

An attorney-in-fact is personally liable to any person, including you, who is injured by an action taken by an attorney-in-fact in bad faith under the power of attorney or by an attorney-in-fact's failure to account when the attorney-in-fact has a duty to account under this section. The attorney(s)-in-fact must act with your interests utmost in mind.

(Wakiilka gaarka ah wuxuu mas'uul ka yahay qof kasta oo dhaawac ku yimaado, xitaa adiga, sabab la xiriirta awoodda wakiilka oo uu si xun u isticmaalay, oo uu ku gafay in uu xilkiisa si mas'uuliyad ah u guto

sida ku cad qaybtaan. Wakiilka sharcig ah waa in uu maskaxda ku haysa in uu shaqadiisa u guto danta aad u wakiilatay)

TERMINATION: If you choose, your attorney(s)-in-fact may exercise these powers throughout your lifetime, both before and after you become incapacitated. However, a court can take away the powers of your attorney(s)-in-fact because of improper acts. You may also revoke this power of attorney if you wish. This power of attorney is automatically terminated if the power is granted to your spouse and proceedings are commenced for dissolution, legal separation, or annulment of your marriage.

(SHAQA KA JOOJIN, Haddii aad dooratid, wakiilka gaarka ahi wuxuu ku dhaqmi karaa dhamaan awoodaha aad siisay inta aad nooshahay oo dhan, ka hor iyo ka dib marka aad noqoto qof aan sharci ahaan go'aan ka gaari karin maaraynta noloshiisa. Laakiin maxkamadu waxay ka qaadi kartaa awoodaas marka uu si xun ugu dhaqmo. Adiguna waad baabi'in kartaa awoodaas haddii aad doonto. Awoodda wakiilka sharciga ah wey joogsanaysaa haddii awoodda la siiyo qofka aad isu dhaxdaan oo ay bilaabato habraaca in la baabi'iyo, kala noolaansho sharci ah, ama xarun/wadaad diimeeed uu guurka baabi'iyo)

This power of attorney authorizes, but does not require, the attorney(s)-in-fact to act for you. You are not required to sign this power of attorney, but it will not take effect without your signature. You should not sign this power of attorney if you do not understand everything in it, and what your attorney(s)-in-fact will be able to do if you do sign it.

(Wakiil ka noqosho sharci ah wuxuu awood u siinayaa, umase baahna, wakiilka gaarka ah in uu ku matalo. Lagaagama baahna in aad saxiixdo wakiil ka noqoshada sharciga ah, laakiin ma hirgelayso haddii aadan saxiixin. Ma aha in aad saxiixdo wakiil ka noqosho sharci ah haddii aadan fahmin wax kasta oo ku qoran, iyo wax uu samayn karo wakiilka gaarka ah haddii aad saxiixdo.)

Please place your initials on the following line indicating you have read this IMPORTANT NOTICE TO THE PRINCIPAL:

(Fadlan ku qor xarafka kowaad ee magacaaga xariiqda soo socota oo muujinaysa in aad akhriday OGAYSIINT MUHIIMKA AH EE QOFKA ASLIGA AH)

IMPORTANT NOTICE TO THE ATTORNEY(S)-IN-FACT

(Ogaysiinta Muhiimka ah ee Wakiilka gaarka ah)

You have been nominated by the principal to act as an attorney-in-fact. You are under no duty to exercise the authority granted by the power of attorney. However, when you do exercise any power conferred by the power of attorney, you must:

(Waxaa qofka ku wakiishay kuu xil saartay in aad u noqoto wakiilkiisa gaarka ah ee matala . wax xil ah kaama saarna in aad fuliso awoodda ay leedahay Wakiil ka noqosho sharci. Si kastaba ha noqotee, marka aad fulinaysid awooda ay ku siinayso wakiil ka noqosho sharci ah, waa in:)

- 1) act with the interests of the principal utmost in mind;
(aad maskaxda ku haysaa in aad ku matasho qofka asliga ah sida ugu sareysa danihiisa)
- 2) exercise the power in the same manner as an ordinarily prudent person of discretion and intelligence would exercise in the management of the person's own affairs;
(In aad awooda u isticmaashid sidii qof caadi ah, caqli badan, indheer garad ah uu u isticmaali lahaa mamulka waxa loo dhiibay sidii wax uu asagu leeyahay oo kale)

- 3) render accountings as directed by the principal or whenever you reimburse yourself for expenditures made on behalf of the principal;

(In aad xisaabta u samaysid sida uu ku faray qofk wakiilka ah ama sida uu rabo qofka kharajka shaqada aad qabto kuu soo celiya sida uu kaa rabo Translation)

- 4) act in good faith for the best interest of the principal, using due care, competence, and diligence;

(Ku matal, niyad wanaag, danta qofka wakiilka ah, adoo haowsha ku fulinaya karti, hawl karnimo, iyo daryeel

- 5) cease acting on behalf of the principal if you learn of any event that terminates this power of attorney or terminates your authority under this power of attorney, such as revocation by the principal of the power of attorney, the death of the principal, or the commencement of proceedings for dissolution, separation, or annulment of your marriage to the principal;

(Jooji hawsha aad ku matalayso qofka aslaka ah marka aad ogaato in la joojiyay wakiil ka noosho sharci ah, ama joojinaysa awooda ay ku siinaysay wakiil kanoqosho sharci , oo ay ka mid tahay baabi'inta qofka aslka ah uu baabi'iyay wakiil ka noqosho sharci, geerida qofka aslka ah, ama bilaabashada habraac lagu tirtirayo, kala noolaansho, guurka qofka asliga ah oo wadaad diimeed baabi'iyay,)

- 6) disclose your identity as an attorney-in-fact whenever you act for the principal by signing in substantially the following manner: Signature by a person as “attorney-in-fact for (name of principal)” or “(name of principal) by (name of the attorney-in-fact) the principal’s attorney-in-fact”;

(Soo bandhig aqoonsigaaga in aad tahay wakiil gaar ah mar kasta oo aad matalayso qofka asliga ah adoo wax u saxiixaya sida soo socota: Saxiixa qof ahaaneed “ wakiilka gaarka ah ee “ (magaca qofk asliga)” ama “(magaca qofka asliga ah) oo uu (magaca wakiilka gaarka ah) qofka asliga ah wakiilkiisa gaarka ah”)

- 7) acknowledge you have read and understood this IMPORTANT NOTICE TO THE ATTORNEY(S)-IN-FACT by signing the power of attorney form.

(Qiro in aad akhriday oo aad fahamtay tan: OGAYSIINTA MUHIIMKA AH EE WAKIILKA GAARKA AH adoo saxiixaya foomka wakiil ka noqosho sharci ah.)

You are personally liable to any person, including the principal, who is injured by an action taken by you in bad faith under the power of attorney or by your failure to account when the duty to account has arisen.

(waxaad si shaqsi ah aad mas'uul ka tahay, uu ku jiro qofka aslka ah, qof kasta oo dhaawac ku yimaado, fal la xiriiira awoodda wakiilka oo aad si xun u isticmaashay, ama aad ku fashilantay in aad xilkaaga u gudato si mas'uuliyad ah marka gudashada mas'uuliyadu ay timaado.)

The meaning of the powers granted to you is contained in Minnesota Statutes, chapter 523. If there is anything about this document or your duties that you do not understand, you should seek legal advice.

(Sharaxaadda awoodaha lagu siiyay waxay ku jirtaa Qodobka Sharciga ee Minnesota, Cutubka 523. Wax kasta oo ku saabsan dukumeentigaan, ama mas'uuliyadaada oo aadan fahmin, waa in aad raadsataa la talin sharci)

REVOCATION OF POWER OF ATTORNEY

Minnesota Statutes, § 523.11

*(BAABI'INTA WAKIIL KA NOQOSHO SHARCI
Qodobka sharci ee Minnesota, 523.11)*

TO WHOM IT MAY CONCERN:

(Ku Socota Cidda ay Khusayaso)

I _____ revoke and declare null and void the

POWER OF ATTORNEY I granted to _____

which is dated _____ 20 _____

*(Anniga _____ waaxa aan ka noqday, oo aan cadeynayaa in aan wax ka
soo qaad laheyn _____ WAKIIL KA NOQOSHADA SHARCIGA AH OO anigu aan siiyay
_____ oo tarriikhdiisu tahay.
_____, 20 _____)*

Please be advised that the above-named person no longer has power to act as my attorney-in-fact in any way.

*(Fadalan la ogow/la soco qofka kor magaciisa lagu sheegay ma haysto awood uu igu matalo sidii in uu yahay
wakil gaar ah, si kasta oo ay tahay)*

Date: _____

(Taariikh)

(Principal) (Wakiishaha)

STATE OF MINNESOTA

(Gobolka Minnesota)

County of _____

(Degmada _____)

The foregoing instrument was acknowledged before me this _____ day of _____ 20 _____

(Cadaynta kor ku xusan waxaa hortayda ku qiray _____ Maantay oo taariikhdu tahay __20____, 20____.)

by _____

(Qofka ah)

Notary Public

(Nootaayo Dadweyne)